

Socodyo maalin iyo safarro habeen dhax inta lagu jiro xilliga iskuulka

Ardaydu wax badan ayey ku baranayaan dugsigga, labadaba marka laga hadlayo aqoon maaddo iyo xirfado bulsho la dhaqan. Mararka qaarkood waxbarashada ugu fiicani waxa ay ka dhacdaa goobo kale oo aan ahayn fasalka.



Tusaale ahaan waxa ay noqon kartaa macquul in la aaddo matxaf leh bandhig la xiriira mawduuca ay ardaydu ka shaqeynayaan. Haddii mawduucu yahay kalluumaysato iyo nolasha badda, waa ay fiican tahay in la qaato qalabka kalluumaysiga iyo in lagu yeesho maalin dugsiyeedka badda agteeda. Haddii ardaydu ay wax ka baranayaan keynta, waa fikrad fiican in lagu lahaado maalin dugsiyeedka keynta gudaheeda. Waxa ay ardaydu ka bartaan safarada, waa wax fiican in looga sii shidaal qaato shaqooyinka ka sii soconaya iskuulka



Waxbaridda goobaha kale ee aan ahayn fasalka, waxa ay fursad fiican u siinaysaa waxbarasho la taaban karo oo si wadajir ah loola sameeyo asxaabta fasalka. Ardaydu waxa ay safarada ka helaan fursad ay ku tijaabiyaan goobaha ay garanayaan iyo kuwa aysan garannayn. Ardaydu waxa ay la kulmaan caqabado dhex jira jawwi aamin ah, oo waxa ay fursad u helaan in ay muujiyaan dhinacyo badan oo naftooda ah.

Waxaa u dheer waxbarasho ka dhacdo safarada kala duwan, in safaradu fursad fiican u yihiin in ku ardaydu isku bartaan siyaabo ka duwan tan ka dhacda iskuulka .

Dugsi xero ah (Ceel jaalle)

Dhammaan ardayda Norway waxa ay fursad u helayaan in ay u safraan ceel jaalle inta lagu jiro dugsigga hoose. Ardaydu waxa ay ula safraan macallimiin ay garanayaan ceel jaalle si ay u bartaan wax cusub. Ceel jaalleyaashu waxa ay sidoo kale leeyihiin macallimiintooda gaarka ah kuwaas oo in badan ka yaqaana goobta uu ku yaalo ceel jaallehu iyo howlaha ay ardaydu ka qeyb qaadan doonaan. Hawlaha ka dhaca ceel jaallehu waa kuwo caafimaad, xiiso iyo waxbarasho. In badan oo ka mid ah waxa ay ardaydu ku bartaan oo ay ku tijaabiyaan ceel jaallehu, waa ay u baahan oo xusuusan doonaan waligood.



Marka fasaladu u safraan ceel jaalleha ama safarada habeen-dhaxa, waxa ay wiilashu seexdaan qeyb, gabdhuhuna qeyb kale, sida fiican qolo kasta dabaqeeda. Macallimiinta ayaa ka mas'uul ah in degganaan iyo kala dambeyni ay ka jiro qolalka. Tani waxa ay ardayda ku abuuraysaa ammaan iyo jawwi wanaagsan iyo waayo aragnimo fiican. Dhammaan ardaydu waa in ay dareemaan ammaan inta lagu jiro safarka.



Marka laga hadlayo cuntada, arday badan waxa ay yeelan karaan baahiyo kala duwan. Tan iskuulka ayaan tixgelinaya. Sidoo kale waa mas'uuliyada iskuulka in ardaydu ay dareemaan ammaan.

Safarada uu iskuulka qabanqaabiyo waa lacag la'aan. Iskuulo badan iyo ceel jaalleyaashu waxa ay leeyihiin qalab ay ardaydu amaahan karaan.

La hadal macallimiinta hadii aad qabtid su'aalo la xiriira safarrada iyo ceel jaalleha. La hadal sidoo kale macallinka hadii uu ilmahaagu ay leeyihiin baahi gaar ah kuwaas oo ay muhiim tahay in la tixgeliyo.